49. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniya.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٩﴾

50. Hadalkeebay Quraanka Dabadiis Rumaynhayaan.

فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَهُۥ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٠﴾

Ruux walba wuxuu la kulmi wuxuu hormarsaday, wuxuuna goosan midhuhuu abuurtay, Mu'miniintuna waxay ku sugnaan Maalintaas Qiyaame hoos, iyo biyo dureeri, iyo nicmo badan, siday gaaladuba ugu sugantahay Naar daran iyo oon iyo kadeedba, maxaa yeelay wanaagoodii adduunyadii bay ku soo hormarsadeen, waxaase la yaable oo iswaydiis leh ruuxii Quraankan rumaynwaaya waxa kalees rumayn. Muqaatil wuxuu sheegay: inay ku soo dagtay aayadda (Haddii loo yidhaahdo tukada ma tukadaan) Ree-Thaqiif, oo Nabiga ka codsaday in salaadda laga daayo, Nabiguna uu diiday naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee oo uu yidhi: Khayr ma leh diin aan salaad lahayn. taasina waxay ku tusin Salaadda iyo Islaamnimadu inay isku xidhanyihiin. Al-Mursalaat (41-50).

## Suurat An-Naba' سورة النبأ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Maxay iska waydiinayaan (Gaaladu).

عَمَّ يَتَسَآءَلُونَ ﴿١﴾

2. Warkii waynaa xaggiisa (Qiyaamada ama Quraanka).

عَنِ ٱلنَّبَإِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢﴾

3. Ay isku diiddanaayeen.

ٱلَّذِى هُمْ فِيهِ مُخْتَلِفُونَ ﴿٣﴾

4. Saas ma aha ee way ogaan donaan.

كَلَّا سَيَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Haddana way ogaandoonaan (waxa ku dhaca).

ثُمَّ كَلَّا سَيَعْلَمُونَ ﴿٥﴾

6. Miyaannaan Dhulka gogol ka yeelin.

أَلَمْ نَجْعَلِ ٱلْأَرْضَ مِهَٰدًا ﴿٦﴾

7. Buurahana Rukummo (ka yeelin).

وَٱلْجِبَالَ أَوْتَادًا ﴿٧﴾

8. Miyannaan idinka Abuurina Noocyo.

وَخَلَقْنَٰكُمْ أَزْوَٰجًا ﴿٨﴾

9. Miyaannaan Hurdada Raaxo idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا نَوْمَكُمْ سُبَاتًا ﴿٩﴾

10. Miyaannaan Habeenka asturaal idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا ٱلَّيْلَ لِبَاسًا ﴿١٠﴾

11. Miyaannaan Maalinta waqti shaqo idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا ٱلنَّهَارَ مَعَاشًا ١١

12. Korkiinna miyaannaan ka dhisin Tooddoba xoog leh.

وَبَنَيْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعًا شِدَادًا ١٢

13. Miyaannaan dhexdeeda yeelin Siraad aad u ifi (Qorraxda).

وَجَعَلْنَا سِرَاجًا وَهَّاجًا ١٣

Aayadahani waxay caddayn canaanta ku dhici kuwa Quraanka, Qiyaamda iyo Xaqa shakiya, Eebana wuu u goodiyay, maxaa yeelay Nicmooyinkiisa yay u jeedaan, sida Dhulka, Buuraha, Abuurka, Hurdada raaxada ah, Habeenka, Maalinta'Cirka iyo Iftiinka Eebe inoo yeelay, Eebaha ahaysiiyay Waxyaalahaas iyo Nicmooyin kale oo badanba ma mudna in laga Gaaloobo, ee wuxuu mudanyahay rumayn iyo addeecid. An-Naba' (1-13).

---

14. Waxaan idiinka soodajinnay daruuraha biyo badan.

وَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلْمُعْصِرَٰتِ مَآءً ثَجَّاجًا ١٤

15. Si aan ugu soo bixinno Midho iyo Daaq.

لِّنُخْرِجَ بِهِۦ حَبًّا وَنَبَاتًا ١٥

16. Iyo Beero kulansan (badan).

وَجَنَّٰتٍ أَلْفَافًا ١٦

17. Maalinta kalabuxu waxay leedahay waqti go'an.

إِنَّ يَوْمَ ٱلْفَصْلِ كَانَ مِيقَٰتًا ١٧

18. Waana Maalinta Suurka la afuufi ood u imanaysaan Kooxo.

يَوْمَ يُنفَخُ فِى ٱلصُّورِ فَتَأْتُونَ أَفْوَاجًا ١٨

19. Samadana waa la furi waxayna yeelan Albaabo.

وَفُتِحَتِ ٱلسَّمَآءُ فَكَانَتْ أَبْوَٰبًا ١٩

20. Buurahana waa la kaxayn waxayna noqon Dhalanteed.

وَسُيِّرَتِ ٱلْجِبَالُ فَكَانَتْ سَرَابًا ٢٠

21. Naarta Jahannamana waxay u darbantahay.

إِنَّ جَهَنَّمَ كَانَتْ مِرْصَادًا ٢١

22. (Gaalada) Xadgudbay meelay u noqdaan.

لِّلطَّٰغِينَ مَـَٔابًا ٢٢

23. Waxayna ku nagaan Dhexdeeda Sanooyin.

لَّٰبِثِينَ فِيهَآ أَحْقَابًا ٢٣

24. Mana ku dhadhamiyaan dhexdeeda qabaw (ama Hurdo) ama cabbid midna.

لَّا يَذُوقُونَ فِيهَا بَرْدًا وَلَا شَرَابًا ٢٤

25. Waxaan ahayn biyo kulul iyo Dhacaanka (ehlu Naarka).

إِلَّا حَمِيمًا وَغَسَّاقًا ٢٥

26. Waxaana lagu abaalmariyay si waafaqsan Camalkoodii.

جَزَآءً وِفَاقًا ٢٦

27. Waxayna ahaayeen kuwa aan ka yaabaynin xisaab.

إِنَّهُمْ كَانُوا۟ لَا يَرْجُونَ حِسَابًا ﴿٢٧﴾

Deeqda Eebe waxay mudantahay in lugu mahadiyo, maxaa yeelay waxaa dambeeya Qiyaame, Xisaab, Abaalmarin iyo Ciqaab kuwa xadgudba een Eebe ka yaabin, waxayna ku waari Naar daran oon wax wanaaagsan oo la cabbo iyo Hurdo iyo Raaxo midna lahayn, Eebana cidna ma dulmiyo, ee iyagaa is dulmiyay.
Qataada wuxuu yidhi: (Nagaanshaha Sanooyinka) waa waxaan dhammaanhaynin, markuu mid tagaba midbaa iman. An-Naba' (14-27).

---

28. Waxayna beeniyeen Aayaadkannaga.

وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا كِذَّابًا ﴿٢٨﴾

29. Wax walbana waxaan ku koobnay Kitaab.

وَكُلَّ شَىْءٍ أَحْصَيْنَـٰهُ كِتَـٰبًا ﴿٢٩﴾

30. Ee dhadhamiya Caddibaad Gaalooy waxaan caddibaad ahayn idiin kordhinmaynee.

فَذُوقُوا۟ فَلَن نَّزِيدَكُمْ إِلَّا عَذَابًا ﴿٣٠﴾

31. Kuwa Eebe ka dhawrsada waxay leeyihiin liibaan.

إِنَّ لِلْمُتَّقِينَ مَفَازًا ﴿٣١﴾

32. Beero iyo Cinabyana way heli.

حَدَآئِقَ وَأَعْنَـٰبًا ﴿٣٢﴾

33. Waxayna Guursan Haween da'yar oo isle eg.

وَكَوَاعِبَ أَتْرَابًا ﴿٣٣﴾

34. Waxayna heli Cabbid wanaagsan.

وَكَأْسًا دِهَاقًا ﴿٣٤﴾

35. Jannada kuma dhexmaqlaan hadal macna la'aan ah iyo is beenin midna.

لَّا يَسْمَعُونَ فِيهَا لَغْوًا وَلَا كِذَّٰبًا ﴿٣٥﴾

36. Waa abaalmarin Eebe uu siiyay oo ku filan.

جَزَآءً مِّن رَّبِّكَ عَطَآءً حِسَابًا ﴿٣٦﴾

37. Eebaha Samada iyo Dhulka iyo waxa u dhexeeya waa Allaha Raxmaan ah, Hadal wax ku soocelinna ma jiro (Qiyaamada).

رَّبِّ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا ٱلرَّحْمَـٰنِ ۖ لَا يَمْلِكُونَ
مِنْهُ خِطَابًا ﴿٣٧﴾

38. Maalinta Jibriil iyo Malaa'igtu Saf istaagi wax hadli ma jiro Ruux Eebe idmo mooyee oo Hadal xaq ah ku hadla.

يَوْمَ يَقُومُ ٱلرُّوحُ وَٱلْمَلَـٰٓئِكَةُ صَفًّا ۖ لَّا يَتَكَلَّمُونَ
إِلَّا مَنْ أَذِنَ لَهُ ٱلرَّحْمَـٰنُ وَقَالَ صَوَابًا ﴿٣٨﴾

39. Maalintaasi waa sugantahay ee Ruuxii doona Eebe xaggiisa meeluu ku noqdo ha ka samaysto.

ذَٰلِكَ ٱلْيَوْمُ ٱلْحَقُّ ۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ مَـَٔابًا ﴿٣٩﴾

40. Waxaannu idiinka digaynaa Cad-
dibaad dhaw Maalinta uu arki Ruux
walba waxay Gacmihiisu hor mar-
sadeen, Gaalkuna uu dhihi Shallay-
tadaydee maan Carro noqdo.

إِنَّآ أَنذَرۡنَٰكُمۡ عَذَابٗا قَرِيبٗا يَوۡمَ يَنظُرُ ٱلۡمَرۡءُ
مَا قَدَّمَتۡ يَدَاهُ وَيَقُولُ ٱلۡكَافِرُ يَٰلَيۡتَنِي كُنتُ تُرَٰبَۢا ٤٠

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa’igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu tahay wax sugan ruuxii rumeeyana ee xaqa raaca uu ugu abaal-mariyo Janno iyo wanaag.
Maalinta Qiyaame iyo dhibaatadeedana waa in Ruuxii Caqli leh u darbadaa, illeen waa Maalin xaq ah, ruux walbana wuu arki wuxuu hor marsaday, calaacalna uusan wax taraynin ee camal wax taro. An-Naba’ (28-40).

## Suurat An-Naazicaat سُورَةُ النَّازِعَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa’igta Nafta si daran uga siibta (gaalada).

وَٱلنَّٰزِعَٰتِ غَرۡقٗا ١

2. Iyo tan si fudud uga qaadda (mu‘miniinta).

وَٱلنَّٰشِطَٰتِ نَشۡطٗا ٢

3. Iyo Malaa’igta Hawada Dabbaalata (si amar fulin).

وَٱلسَّٰبِحَٰتِ سَبۡحٗا ٣

4. Iyo tan u orotanta wanaagga.

فَٱلسَّٰبِقَٰتِ سَبۡقٗا ٤

5. Iyo kuwa Maamula amarka (Eebe).

فَٱلۡمُدَبِّرَٰتِ أَمۡرٗا ٥

6. Maalinta ay gilgilan afuufka (hore).

يَوۡمَ تَرۡجُفُ ٱلرَّاجِفَةُ ٦

7. Oyna raaci tii dambe (waa sugantahay).

تَتۡبَعُهَا ٱلرَّادِفَةُ ٧

8. Qalbiyaduna Maalintaa way cabsan.

قُلُوبٞ يَوۡمَئِذٖ وَاجِفَةٌ ٨

9. Araggeeduna wuu dullaysnaan.

أَبۡصَٰرُهَا خَٰشِعَةٞ ٩

10. Waxayna dhihi (Gaaladu) Ma raadkiibaa naloo celin (Adduunkii).

يَقُولُونَ أَءِنَّا لَمَرۡدُودُونَ فِي ٱلۡحَافِرَةِ ١٠

11. Markaan noqonno Lafo duugoobay.

أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمٗا نَّخِرَةٗ ١١

12. Waxay dheheen taasi waa noqosho khasaara ah.

قَالُواْ تِلۡكَ إِذٗا كَرَّةٌ خَاسِرَةٞ ١٢